

# Daryeelka guska iyo buuryada

Somali

Waa muhiim in la fiiriyo guska iyo Buuryada ilmahaaga si aad u ilaaliso caafimaadka oo looga hortago casaanka, xanuunka iyo caabuqa.

Buuryadu waa maqaarka dabacsan oo daboolaya madaxa (glans) guska. Badanaa dhalaanka, buuryada lama bujin karo (dib uga soo laabanayn madaxa guska), laakiin waqti ka dib maqaarku wuu kala soocmaa waana la bujin karaa.

Badanaa wiilasha yar yar ayaa si joogto ah u taab-taabtaan ama ku ciyaaraan guskooda. Tani waa qayb caadi ah oo ka mid ah horumarkooda iyo sida ay u bartaan jirkooda. Markay buuryadu diyaar u ahaado in la bujiyo, ilmahaagu isagaa iskiis u ogaanaya.

Ilmaha la gudo oo buuryada laga jaro waxaa lagu sameeya qaliin.

## Goynta Buuryada

Buuryada way ka soocantaa ilmo badan oo hal sano jira, iyo boqolkiiba 90 wiilasha afar jirada ah waxay yeeshaan buuryo soocanta. Si kastaba ha ahaatee, ilmaha qaarkood soocitaanku ma dhaco ilaa qaan-gaark. Taasina waa caadi. Xaalado dhifa oo loo yaqaano phimosis, buuryada marna lama bujin karo.

Guska iyo buuryada si dabiici ah ayay u kala soocmaan, waxaase jira casaan ama xanuun marka la kaadinayo (kaadi yar). Taasina waa mid caadi ah sida badana waxay bogsootaa maalin ama laba maalin ka dib. Markii kala sooco dhaco. waxyaalo yaryar oo midab cadaan/huruudda ah (baaro) ayaa samaysmi kara. Baaradu waa caadi mana ahan wax laga walwalo.

## Daryeelka guriga ah

- Haku qasbin inaad bujiso buuryada ilmahaaga si aad u nadiifiso. Looma baahna in la nadiifiyo gudaha buuryada carruurta yar yar. Isku-dayga la qasbo buuryada waxay u keeni kartaa cillado iyo dhibaatooyinka mustaqbalka.
- Marka buuryada si sahlan loo bujiyo, ilmahaagu waa inuu bartaa inuu taas sameeyo sida qayb ka mid ah qubayska. Guska waa in loo dhaqaa si la mid ah qaybaha kale ee jirka. U hubso in ilmahaagu biyo ku mayro saabuun kasta uuna soo celiyo buuryada si uu u daboolo madaxa guska.
- Buuryada waa in had iyo jeer la beddelo si loo daboolo madaxa guska kadib marka ilmahaagu kaadsho.
- Ha marin kiriimyada antiseptika ah ama looshanada kale guska ama buuryada (haddii uusan dhaqtarku qorin).

Furuuraca xafaayadda ayaa sababi kara gaduudasho iyo xanuun ku dhaca guska ilmahaaga. Si looga hortago furuuraca xafaayadda, hubso inaad si dhaqso ah u beddesho xafaayadaha qoyan ama wasakhda ah.

- Isku day inaad ka dayso ilmahaaga adiga oo aan xafaayad u xirin waqti gaaban. Hawada cusub waxay caawineysaa in looga hortago furuuraca xafaayadda, waxayna ka caawin doontaa finanka xafaayadda inuu ka bogsado.
- Ugu Qubeynta qubayska diiran wuxuu ku caawinayaa inuu ka yareeyo maqaarka casaanka ama xanuunka. ka dibna si fiican u qalaji.
- Isticmaal xanibaha ama kareemka furuuruca xafaayadda mar kasta oo la badalo xafaayadda, oo ay ku jiraan caarada guska, oo iska ilaali inaad u isticmaashid tirtirayaasha naabiga guska.

## Goorta la arko dhaqtarka

Gee ilmahaaga dhaqtarka haddii:

- guska cas yahay ama bararo
- ilmahaagu uu u muuqdo mid dhiban marka uu kaadinayo
- ilmahaagu wuxuu leeyahay qandho iyo calaamado kale oo la socda
- hadduu jiro dheecaan ama malax ka imanaya guska
- buuryada ilmahaagu ay waynaato marka kaadida ka soo baxdo.

**Haddii buuryadiisu la bujiyo oo ay noqoto mid ku dhagan, raadso daryeel caafimaad oo deg deg ah dhaqtarkaaga ama isbitaalka.** Tan waxaa loo yaqaan 'paraphimosis' waxayna u baahan tahay dib u eegis daaweyn degdeg ah.

## Qodobbada muhiimka ah ee in la xusuusto ah

- Buuryada ilmahaaga waa inaan marnaba la qasbin si loo nadiifiyo.
- U dhaq guska sida qeyb kasta oo ka mid ah jirka ilmahaaga, oo hubso inaad ka biyo-raaciso saabuun kasta. Ilmahaaga bar inay saas sameeyaan taas oo qayb ka ah dhaqitaankooda caadiga ah
- Hubi inaad si dhaqso ah u beddesho xafaayadaha qoyan ama wasakhda.
- **Haddii buuryada la bujiyo soona noqoto ayna noqoto mid ku dhagan, raadso daryeel caafimaad oo degdeg ah.**

## Macluumaad dheeraad ah

- U tag dhaqtarkaaga, Kalkaalisada caafimaadka hooyada iyo ilmaha ama dhaqtarka carruurta.



Waxaa soo diyaariyay The Royal Children's Hospital isagoo taageero ka helaya Dawlad-goboleedka Victoria Government [rch.org.au/kidsinfo](http://rch.org.au/kidsinfo)

### Dib-u-eegidda 2018

Kids Health Info waxaa taageera The Royal Children's Hospital Foundation. Si aad ugu deeqdo, ka eeg [rchfoundation.org.au](http://rchfoundation.org.au)

## Afeefta

Macluumaadkani maaha inuu beddelo wada hadalka dhaqtarkaaga ama xirfadlaha daryeelka caafimaadka. RCH wuxuu sameeyey dadaal macquul ah si loo hubiyo in macluumaadkani uu sax yahay wakhtiga daabacaadda. RCH kama ahan mas'uul wixii khalad ah, isfaham la'aan, ama guusha daaweyn kasta oo lagu xusay qoraalladan. Macluumaadkan si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa. Had iyo jeer hubi oo hubi in aad haysato macluumaadkii ugu dambeeyey.